

GO'AANKA No. 4459

Qabatinka Siyaasadda Sinaanta ee Dugsiyadda Guud, Siyaasadda 2.10-010-P

GO'AANKA

Gudiga Waxbarashadda ee Dugsiyadda Guud ee Portland waxa uu di-u-eegid ku sameeyey talo soo jeedintii Gudiga Najaxa Ardayda si loo qabatimo Siyaasadda sinaanta iyadii oo la raacay siyaasadda degmadda ee (1.70.020-p), Gudiga Degmadu waxa uu doonayaa in lagu soo bandhigo siyaasad walba aqalka degmadda mudo 21 cisho ah si ay dadwaynuhu u eegaan. iyadii oo ay tahay in la buuxiyo shuruudaha iyo iyadii oo aan la qaban aragtida dadwaynaha tan la xidhiidha wax ka bedelidda siyaasadda lasoo bandhigay. Gudiga Waxbarashadu waxa uu taageeray Luqadda siyaasadda lasoo jeediyey in la qabatimo..

SIYAASADDA LASOO JEEDIYEEY:

Qabatinka Siyaasadda Sinaanta ee Dugsiyadda Guud, Siyaasadda 2.10-010-P

Gudiga Waxbarashadda ee Dugsiyadda Guud ee Portland waxaa ka go'an najaxidda arday walba oo ka tirsan dugsiyadda degmadda. Muhimadda Dugsiyadda Guud ee Portland waa in dhamaadka dugsiiga hoose, dhexe, iyo sare uu arday walba iyadii oo qusuusi ah uu gaadho ama dhaaf heerkaa akadeemiyadeed ee laga filayey, islamarkaana loo diyaariyo in uu gaadho go'aano wax ku ool ah oo la xidhiidha nolosha. Waxaanu aaminsanahay in uu arday waliba leeyahay fursadii uu taa ku gaadhi lahaa, waana mas'uuliyadda degmadda in ay siiyaan arday walba fursadda iyo taageeradda uu u baahanyahay sidii uu ugaadhi lahaa/lahayd halka ugu sareysa ee ay higssanayaan.

Iyadii oo ay ku salxidhan tii laga dhaxlay muhimadaa iyo imaanteena. Taariikhda Dugsiyadda Guud ee Portland, jiritaanka joogtadda ah ee farqiga udhexeeya najaxa ardayda cadaanka ah iyo kuwa kale oo aan marnaba la aqbali Karin. Iyadii oo dadaalkii ay taasi mudnayd lagu baxshay sidii wax looga qaban lahaa, dadaaladaasi sidii badnayd ma aysan najixin. Iyadii oo la garowsanyahay in kooxaha kale ee ardaydu aysan gaadhin heerkaa najaxa, nidaamkani waxa uu xooga saarayaa sooyaalkii ugu xooganaa ee farqiga heerka najaxa ee udhexeeya ardayda cadaanka ah iyo kuwa kale. Teedida farqiga heerka najaxa iyadii oo ay kordhayso tiradda najaxa ardayda oo dhan waa mudnaanta koowaad ee Gudiga Waxbarashadda, Madaxa dugsiyadda degmadda iyo howlwadeenadda. isirku waa in uusan noqon mid lagu qiimeeyo najaxa iyo horumarka ardayda.

Dugsiyadda Guud ee Portland, Sanad walba oo aan uruurino macluumaad, waxaa muuqata in ardayda cadaanka ah ay kaga wanaagsanyihiin gudashadda kuwa kale sida madowga, kuwa asal ahaan kasoo jeeda Maraykanka, iyo Isbaanishka gaadh ahaan marka la eego qiimeyntii gobolka ee maado walba iyo heer walba. Ardayda cadaanka waxa ay si joogta ah tiro in badanna ka badan tan madowga ogaga qalin jebiyaan dugsiyadda sare. Halka ardayda midabka duwan in badan xagga anshax ku qaadida ay kaga badanyihiin kuwa cadaanka ah farqigaa waa wax aan la aqbali Karin waxayna si toos ah oga hor imanayaan imaantayadii ahayd in ardayda oo dhami ay najixi karaan.

Mas'uuliyadda kala tagaa udhexeysa dhaliinyaradda waxa ay dib ugu soo laabanaysaa dadka waawayn, waanu ognahay in macluumaadka najaxa ardayda ee dugsiyadda dalka oo dhan ay tilmaamayaan mid un tan la mid ah, arimhaa is-huwan ee bulshadeed iyo taariikheed ayaa iyadna ah mid ka qayb qaadanaysa gabood falka ay aradydeenu wajahayaan. Iyadii oo ay taasi jirto hadana waxaa ay umeel dayaysaa jogtaynta farqigaa. Dugsiyadda Guud ee Portland waa in ay ka hadlaan islamarkaana ay ka gudbaan sinaan la'aantaa iyo hay'ad faquuqa, iyagii oo siinaya dhamaan ardayda oo dhan taageerada iyo fursadaha ay u baahanyihiin tan la xidhiidha najaxaan.

Dugsiyadda Guud ee Portland waxay si muuqata oo la taaban karo u bedelayaan holwagalooda si loo gaadho islamarkaana loo meel mariyo sinaanta xagga isirka ee waxbarashadda. Sinaanta waxbarashadda waxaa loola jeedaa sara uqaadida najaxa ardayda oo dhan (1)gegtirka fariigga u dhexeeya gudashadda halka ugu saraysa iyo kan ugu horeeya ee ardayda (2)baabbi'inta wax ku saadaalinta isirka iyo isudhigaan la'aanta tan lagu asteeyo heerarka najaxida sare iyo hoose.2 Aragtida

sinaanta waxbarashadda waa ay ka durugsantahay sinaanta caadiga ah ee odhanaysa --- in ardayda si siman loola dhaqmo.¹ Ujeedada siyaasadan, "isirka" waxaa lagu qeexay sidan "A Dhismaha bulshadda ee si muqudahan u qaybinaysa dadka qaybo yaryar oo ku dhisan tilmaamo sida muuqa(gaadh ahaan midabka), hido, dhaqan ay ku tiirsanyihiin, sooyaalka ummadeed, isir lagu aqoonsado, iyo baahida hab-dhaqan dhaqaale iyo siyaasad ee ay lahaayeen mudo." Maurianne Adams, Lee Anne Bell, and Pat Griffin, editors. *Teaching for Diversity and Social Justice: A Sourcebook*. (2007).

² Glenn Singleton and Curtis Linton *Courageous Conversations About Race*, p. 46 (2006)

--qabatinka teedaha – bii'ad madax banaan halka dhamaan ardayda oo dhan, iyadii oo aan loo eegin halka ay isir ahaan kazoo jeedaan, ay helaan fursado ay si dhan oga wada faa'iidayaan karaan. Usinaanta waxbarashadda waxaa ka wada faa'iidayaanaya aradyda oo dhan, iyo bulshadeena oo dhan. Ardayda kazoo jeeda dhamaan isiradda kala duwan waa in ay ka qalin jebiya PPS ay diyaar u yihiin ka duwanaanshaha maxaliga ah ee dhaqanka iyo isirka, dalka oo dhan iyo bulshadda caalamka. Si loo gaadho sinaanta waxbarashadda, PPS waxay bixinaysaa ilo macluumaad oo dheeri ah si loo barataaro najaxa dhamaan ardayda, marka lagu daro ardayda midabka duwan.

Si hadaba loo gaadho sinaanshaha isirka ee ardaydeena, gudigu waxa uu sal xidhay ahdaaftan:

Degmadu waa in ay siisaa arday walba fursad loo simanyahay oo la leh tacliimaad la saan qaada dhaqanka, manhajka, caawinta, qalabka iyo ilaha macluumaadka kale ee waxbarashadda, xataa marka tan loo jeedo kala duwida macluumaadka si loo gaadho ujeedadan.

Degmadu waa in ay hal-abuurtaa dowyo kala duwan oo ku jeeda najaxa si loo gaadho baahida kala duwanaanshaha ardayda, iyadii oo si dhiiran loogu dhiiri gelinayo, caawinayo islamarkaana laga filayo najax akadeemiyadeed oo sare yadii oo laga filayo najax akadeemiyadeed oo sare tan la xidhiidha isiradda kooxaha.

Degmadu waa in ay uruurisaa, shaqaalaysaa, caawisaa islamarkaana ay illaaleeysaa kala duwanaanshaha isirka, luqadda iyo dhaqanka, howlwadeenadda caawinta iyo tacliinta, iyo diyaarinta horumarinta xirfadalayaal si loo tayeeylo aqoonta iyo xirfadda howlwadeenada si loo dhimo farqiga isirka ee najaxa. Marka lagu daro Qaanuunka Macalimiinta Laga Tiradda Badanyahay, degmadu waa in ay si dhiifoon ugu dadaashaa in macalimimiinteena iyo maamulkaba si ay oga warceliyaan kala duwanaanshaha ardayda.

Degmadu waa in ay xalisaa arimaha marka lagu daro qiimeynta, kan ku hagaya matalida ardayda midabka duwan arimaha sida waxbarashadda gaadhka ah iyo anshaxa, iyo in aysan jirin cid matasha barnaamijyadda qaar sida kuwa hibadda la siiyey iyo meelaynta horumarsan.

Dhamaan howlwadeenadda iyo ardayda waa in la siiyaa fursadda in ay fahmaan aqoonsiga isirka, iyo saamaynta aqoonsiga isirkoodu uu ku leeyahay iyagga iyo kuwa kale.

Degmadu waa in ay soo dhawaysaa oo ay tayeysaa (marka lagu daro kuwa luqadooda koowaad aysan ahayn Ingiriisi) iyagii oo ka dhigan waday asaasi ah tan ku jeeda waxbarashadooda, qaabaynta dugsiga iyo go'aan qaadashadda degmadda. Degmadu waa in ay abuurtaa bii'ad soo dhawayneed tan oo ka jawaabaysa islamarkaana caawinaysa isiradda iyo qowmiyadaha kala duwan bulshadaa. Marka lagu daro, in degmadu waxa ay ku dari doontaa wadaayadda kuwa ka qayb qaadanaya – khusuusi xagga dhaqanka – marka lagu daro hay'daha dowladda, kuwa aan dowliga ahayn, ganacsatadda iyo sida guud bulshadda – si aynu ugaadho maxsuulka waxbarashadda.

Degmadu waxay dusha ka saaraysaa mas'uuliyadda in ay qiyaasaan horumarka in Madaxa Degmadda madaxda xarunta dhexe iyo howlwadeenadda si loo gaadho ujeedooyinka la higsanayo. Howlwadeen walba oo ka tirsan Dugsiyadda Guud ee Portland najaxa iyo horumarka dhamaan ardayda. Gudigu waxa uu aqoonsanyahay in ay kuwani yihiin ahdaafta xili fog tan oo doonaysa shaqo dhab ah iyo illo macluumaadeed si looga hirgeliyo dhamaan dugsiyadda oo dhan. Sida, Gudiga iyo Madaxa Degmadda si ay uqaabeeyaan qorshe cad oo horay loogu marinayo iyadii oo ay mas'uuliyadu caddahay iyo tubta, iyadii oo qayb ahaan lagu darayo sida ay ukala mudantahay howlwadeenadda iyo xisadda misaanayadeed, tan oo maxsuulkeedu noqon doono maxsuul qiyaasan ee sanadle ku dhisan tan la xidhiidha gaadhida ahdaafta xagga sare lagu xusay. Talaabooyinka howlaha waa in ay qeexaan hogaanka howlwadeenadda ee dhamaan isha howlaha. Madaxa Degmadu waxa uu soo bandhigi doonaa Gudiga qorshaha lagu meel marinayo ahdaafta A illaa F iyadii oo ay la jidho sadex bilood ee qabatinka siyaasadan. Intaa ka dib, Madaxa dugsiyadda waxa uu ka warbixin doonaa horumarka laga sameeyey ahdaafta ugu yaraan laba jeer sanadkii, iyaga oo usoo gudbinaya Gudiga qorshe howleed la gigtiray ee sanad walba.

Isha: "The State of Black Oregon" (The Urban League of Portland 2009); "Communities of Color in Multnomah County: An Unsettling Report" (Coalition of Communities of Color/Portland State University 2010); "The Economic Cost of the Achievement Gap" (Chalkboard Project 2010); "The Hispanic/White Achievement Gap in Oregon" (Chalkboard Project 2009); "A Deeper Look at the Black-White Achievement Gap in Multnomah County" (Chalkboard Project 2009); ORS 342.433.

Taariikhda:

Waxaa la qabatimay – June 13, 2011